Immigratie- en Naturalisatiedienst
*Ministerie van Justitie en Veiligheid*

# Sidee ka mamnucis soo gelitaan kuu saameyn karaa?

Waxaa lagu siiyay ka mamnucis soo gelitaan. Go’aanka aad heshay waxaa ku taal sababta lagu siiyay ka mamnucis soo gelitaan. Warqaddan warbixineed ka aqriso waa maxay ka mamnucis soo gelitaan iyo sida ay kuu saameyneyso.

1. Waa maxay ka mamnucis soo gelitaan iyo waddamadee ayeey quseeysaa?
2. Muddadee ka mamnucis soo gelitaan ay soconeysaa goorma ayeyna istaageysaa?
3. Waa maxay macnaha digniin gelinta Hab Warbixinta Schengen {Schengeninformatiesysteem (SIS)}?
4. Goorma ayaa astaamahada shaqsiga laga saarayaa SIS?
5. Maxaa dhacaaya haddii aadba Nederland joogto?
6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo ka mamnucista soo gelitaan?
7. Goorma ayaad dib Nederland u soo geli kartaa?
8. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis ka mamnucista soo gelitaan?
9. Maxaad yeeli kartaa haddii aad su’aalo qabto?

### 1. Waa maxay ka mamnucis soo gelitaan iyo waddamadee ayeey quseeysaa?

Laguma oggola muddo la xaddaday in aad u safarto iyo aad ku sugnaato waddamada Ururka Yurub {Europese Unie} (EU), Nawaaxiga Dhaqaalaha Yurub (EER) iyo Swissera. Ka aqris www.ind.nl/eueer iyo www.ind.nl/en/eueea kuwa ay yihiin waddamada- EU/EER. Halkan waxa ka dambeeya waxaan waddamadaa ku magacaabeynaa EU. Ka mamnucista soo gelitaan ma quseyso Irlanda.

Waxaa lagu siinayaa ka mamnucis soo gelitaan oo keli ah keddib go’aan dib u noqosho. Kaasi waa go’aan ay ku taallo in aadan Nederland ku sugnaan karin ayna tahay in aad ka dhoofto EU. Waana in aad ku noqoto waddanka ku yaal go’aanka dib u noqosho. Ama waddan kale oo ka baxsan EU (oo Irlanda laga reebay) oo aad joogi karto.

### 2. Muddadee ka mamnucis soo gelitaan ay soconeysaa goorma ayeyna istaageysaa?

Waxa ay ku xiran tahay xaaladdaada inta sano oo ay ka mamnucista soo gelitaan soconeyso. Go’aanka lagu siiyay ayeey ku taallaa muddada ay ka mamnucistaa soo gelitaan soconeyso.

Muddada ka mamnucis soo gelitaan waxa ay bilabaneysa taariikhda aad ka tagto EU. Ma ogtahay IND in aad ka tagatay EU? Markaa ka mamnucista soo gelitaan waxa ay joogsaneysaa marka muddada ku taal ka mamnucista soo gelitaan ay dhammaato. Markaa waxaa SIS laga saarayaa digniin gelinta keddibna waa kuu fasax in aad u soo safarto Nederland iyo waddamada-EU oo kale. Ka aqriso su’aal 3 waxa digniin gelin iyo SIS yihiin.

### 3. Waa maxay macnaha digniin gelinta Hab Warbixinta Schengen {Schengeninformatiesysteem (SIS)}?

Waxaa lagaa digniin gelinayaa ka mamnucista soo gelitaan. Laga digniin geliyay ama digniin gelin waxaa lagu jeedaa in ay dowladda ay magacaada geliso Hab Warbixinta Schengen (SIS) ee EU. Xad ilaaliyaasha iyo boliiska waddamada Schengen waxay ka arkayaan digiin gelinta SIS in aad leedahay ka mamnucis soo gelitaan. Baaritaan keddib waa ay ku celin karaan. Markaa laguma oggola in waddanka soo gasho. Ka aqriso waddamada Schengen ka mid ah www.ind.nl/schengengebied ama www.ind.nl/schengenarea.

*Digniin gelinta koowaad ee go'aanka dib u noqoshada*
Digniin gelinta ee ka mamnucis soo gelitaan isla markaa ma dhaceyso. Marka hore waxaa SIS laguu gelinayaa digniin gelinta go'aanka dib u noqosho. Ma ka tagtay EU mana ogtahay taasi IND? Markaa ayaa digniin gelintaada ay isku beddeleysaa digniin gelin ee ka mamnucis soo gelitaan. Ma u soo safri kartid EU mana ku sugnaan kartid. Ka aqriso dheeraad ku saabsan digniin gelinta iyo go'aanka dib u noqosho [www.ind.nl/nl/terugkeerbesluit](http://www.ind.nl/nl/terugkeerbesluit) ama [www.ind.nl/en/return-decision](http://www.ind.nl/en/return-decision).

*Xuquuqda ku sugnaasho EU iyo ka mamnucis soo gelitaan oo Nederland*
Ma leedahay xuquuq ku sugnaasho waddan-EU mana ku siisay dowladda Nederland ka mamnucis soo gelitaan? Makaa waxaa keli ah digniin gelin SIS la sameynayaa haddii waddanka-EU xuquuqdaada ku sugnaasho ay kaa ceshtaan. Dowladda markaa waxa ay ku dul saari karan xeer nidaamed kale. Waxaa lagu siinayaa digniin gelin ee Hab Warbixinta Nederland Fulinta & Digniin Gelinta (E&S). Boliiska iyo Xad Ilaaliyeyaasha Boqortooyada oo keli ah ayaa baari karo E&S.

### 4. Goorma ayaa astaamahada shaqsiga laga saarayaa SIS?

- Marka la hubiyo in muddada ka mamnucista soo gelista ay dhammaatay.
- Haddii ay IND ogaato in adiga keddib ka mamnucista soo gelitaan aad xuquuq jogitaan ka heshay waddan-EU ah. Markaa IND waa ay kaa dul qaadeysaa ka mamnucista soo gelitaan waxayna digniin gelintaada ka saareysaa SIS. Hadii aad nidaamka guud qatar gelineeyso dowladda waxa ay ku dul saari kartaa xeer nidaameed akale. Waxaa taa lagaa siinayaa digniin gelin ee Hab Warbixinta Nederland Fulinta & Digniin Gelinta (E&S).
- Waxaad codsatay ka dul qaadis ka mamnucistaada soo gelitaan codsigaana waa lagaa oggolaaday. Su'aal 8 waxaa ku taal sida ka dul qaadistaa loo dalbado. Ma lagu siiyay ka dul qaadis ka mamnucista gelitaan oo ku meel gaar ah? Markaa digniin gelintaada ee SIS waa jireysaa.

### 5. Maxaa dhacaaya haddii aadba Nederland joogto?

U soo safrista Nederland iyo ku sugnaashada Nederland ciqaab ayeey mudan tahay. Waxaa lagu xabbisi karaa muddo ugu badnaan ah 6 bilood ama laguugu ganaaxi karaa dhowr kun oo yuro. Taasi waxa ay ku taal qodob 197 ee  Buugga Sharciga Xeerka Ciqaabta iyo qodob 108 ee Sharciga Ajaanibta.

### 6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo ka mamnucista soo gelitaan?

Taasi xaaladda ayeey ku xiran tahay. Waxaad dacwad celin geeysan kartaa IND ama abiil ayaas maxkamadda ka qaadan kartaa.

### 7. Goorma ayaad dib Nederland u soo geli kartaa?

- Marka la hubiyo in muddada ka mamnucista soo gelista ay dhammaatay.
- Waxaad codsatay (in si ku meel gaar ah) ka mamnucista gelitaan lagaaga dul qaado, codsigaana waa lagaa oggolaaday.

### 8. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis ka mamnucista soo gelitaan?

Waxaad codsan kartaa (in si ku meel gaar ah) ka mamnucista gelitaan lagaaga dul qaado. Maadaama tusaale ahaan ay tahay in aad Nederland joogto wakhtiga weli ay ka mamnucistaad soo gelitaan aysan dhammaan. Amaba maadaama ay IND ogeyn weli in aad ka baxday EU. Waxaad taasi u adeegsan kartaa foomka *Codsi ka dul qaadis ee caddeyn mid aan la dooneyn ama ka mamnucis soo gelitaan* (9004 of 9504) oo website-ka ka heleyso, soo buuxbuuxi una soo dir IND. Ama warqad sharraxaad leh ayaad u soo direysaa IND taasi oo aad ka dul qaadis ku codsaneyso. Qof kale ayaa xitaa kuu codan karo ka dul qaadista. Markaa waa in aad qofkaasi si dhaxal gal ah u wakiilataa in uu magacaada ku hawl geli karo. Taasi warqad ayaad ku qoreysaa oo aad saxiixday. Waxaa taasi la yiraadaa awood siin. Awood siinta soo raaci codsiga ka dul qaadista ka mamnucista soo gelitaanka.

U soo dir foomka ama warqadda:
IND Titel en Identiteit
Postbus 10
9560 AA Ter Apel

*Xujjooyika  ka dul gaadista ka mamnucista soo gelitaan*
IND waxay kartaa (in si ku meel gaar ah) ka mamnucista gelitaan lagaaga dul qaado haddii aad xujjooyinka soo socda ka soo baxdo:

- Ka dul qaadista xaaladdaada waa mid lagama maarmaan ah.
- Oo keli ah marka ka mamnucista soo gelitaan ay 2 sano ama ka yar tahay:
    - Waxaa muddada nus ama ka badan ka mid ah ee ka mamnucista soo gelitaan si xiriirta uga maqneyd EU.
    - Dembi culus ma aadan gelin muddada aad Nederland ka maqneyd.
    - Wakhtiga xaadirka ah laguuma daba joogo fal dembiyeed xeerka ciqaabta soo hoos gelaaya.

*Dokumentiga ka dul gaadista ka mamnucista soo gelitaan*
Soo raaci foomka ama warqadda warbixinta ama dokumentiga soo socda:

- Sharaxaad sababta ay ka dul qaadista ka mamnuucista soo gelitaan ee xaaladdaada ay u tahay daruuri.
- Astaamahaada shaqsiga oo dhammeys tiran iyo magacyo kale (aliassen) aad hore u adeegsatay.
- Koobiyada baalalka oo dhan ee baasaboorrada aad yeelatay sidii laguu dul saaray ka mamnucista soo gelitaan. Ama dokumentiyo kale oo lagu safri karo ama xad lagaga tallabi karo.
- Aragtida guud iyo caddeynta waddamada iyo magaalooyinka aad tagtay sidii laguu dul saaray ka mamnucista soo gelitaan. Taasi waxa aad ku muujineysaa in wakhtiga aad codsiga sameyneysay ku sugneyd goob ka  baxsan EU.
- Dokumentiga dhaxalgalka ah ee dowladaha waddamada aad tagtay keddib dul saarista ka mamnuciista soo gelitaan. Halkaa waa in laga dhex helaa in aad waddankaa aadan dembi culus ku gelin. Iyo in aan hadda waddankaasi laguu daba joogin fal dembiyed xeerka ciqaabta soo hoos gelaaya.
- Ma tahay qasab in aad wakhti gaaban Nederland joogto? Soo dir markaa xitaa warbixinta soo socota:
    - Taariikhda aad Nederland soo geleyso iyo magaalada aad Nederland ka soo geleyso.
    - Nambarka duulimmaadyada- soo gelista iyo dib u noqoshada.
    - Aragtida guud oo magalooyinka ee Nederland oo aad ku sugnaan doonto. Iyo caddeynta hubineysa ku sugnaashadaada iyo kharashka la xiriira.
    - Haddii uu quseeyso kiis xeerka ciqaabta: warbixin ku saabsan xaaladda taagan iyo  geedi socodka kiiska xeerka ciqaabta.
- Haddii aad qof kale wakiilaneyso in uu kuu codsado ka dul qaadista: awood siinta oo leh saxiixaada.

Dokumentiyada waddamada dibedda oo dhaxalgalka ah waa in aad soo tasdiiqisaa aadna ku soo tarjumtaa afka nederlaandiiska, ingriiska, fransiiska ama jarmalka. Ka aqriso warbixin ku saabsan tasdiiqinta iyo tarjumista www.ind.nl/legalisatie-vertaling ama www.ind.nl/legalisation-translation.

## 9. Maxaad yeeli kartaa haddii aad su’aalo qabto?

- Booqo website-kenna www.ind.nl/inreisverbod of www.ind.nl/en/entry-ban.
- Wac leynka warbixinta ee IND  +31 88 043 04 30. Waxaad nambarkaan heli kartaa isniin ilaa iyo jimce saacadaha 09.00 ilaa iyo 17.00 saac.

*Nuxurka daabacadda wax xuquuq ah lagama dhaxlaayo. Haddii ay tarjumista ay keento sharraxaado kala duwan, waxaa la tix raacayaa tan af nederlandiisaka ku qoran. Nuqul qoraalkan ka mid ah waa la isticmaali karaa haddii halkaa lagu xuso barta aad ka soo xigatay.*